

In qofka uu lumo waxay dhalin kartaa cabsi badan, waxay dhalin kartaa halis. Gaar ahaan marka laga hadlo qofka beelay xasuusta (dementia), qofka qaba autism, ama qofka qaba itaal darri kale oo la xariirta koriimada.

Weydii naftaada: Ma dhici karta in qofka aad jeceshahay uu sheego ama ay sheegto magaceeda iyo cinwaankeeda haddii ay lunto?

Haddii jawaabta tahay maya, ama laga yaabo in ay isbddasho, ku fakar in aad ku qortid brograamka Guriga i Geey (Take Me Home).

Brograamka Guriga i Geey (Take me Home) waa shabakad loo sameyay amaanka mustaqbalka, si aad u dagtid maanta. Waa sida soo socota:

- Si fudud isaga diiwaan geli internetka www.sdsheriff.gov/takemehome
- Soo gudbi sawir, macluumaad aasaasi ah iyo qofka loo baahan yahay in lala xariiro – kaddibna waa dhamaatay!

Macluumaadkaan waa qarsoodi, waxaana heli kara oo keliya ciidanka hirgelinta sharciga marka ay la kulmaan xaalad xaalad degdeg ah.

Marka qofka lumo, sekan kasta waa muhiim. Waxaad maanta qaadataa 5 daqiiqo si aad kaalmo uga geysatid nasiib darrada mustaqbalka.



Wakaaladaha Iskaashada

Waxaad kaloo isku qori kartaa brograamka Guriga i Geey (Take Me Home) ee laga qaato kuwa aan iskaashiga la leenahay.

Alzheimer's San Diego

858.492.4400
3635 Ruffin Rd., Suite 300
San Diego, CA 92123
www.alzsd.org

Autism Society of San Diego

858.715.0678
4699 Murphy Canyon Rd.
San Diego, CA 92123
www.autismsocietysandiego.org

One Safe Place

1050 Los Vallecitos Blvd.
San Marcos, CA 92069
www.onesafeplacenorth.org

San Diego Regional Center

858.576.2966
4335 Ruffin Rd., Suite 200
San Diego, CA 92123
www.sdrcc.org

ARC of San Diego

619.685.1175
3030 Market St.
San Diego, CA 92102
www.arc-sd.com



www.sdsheriff.gov/takemehome

Waxaa soo saartay Waaxda Sherifka Dagmada San Diego (San Diego Sheriff's Department) u qaabilsan wakaaladaha hirgelinta sharciga deegaanka.



Kaalmada la siiyo kuwa halista ku jira ee Rer San Diego si ay gurigooda u tagaan iyagoo nabad qaba.



ISKU QOR BILAASH

www.sdsheriff.gov/takemehome

Su'alaha Badanaa La Weydiiyo (FAQs)

Maxuu Yahay Brograamka Guriga i Geey (What is the Take Me Home Program)?

Diiwaan gelinta waxay hirgelinta sharciga siisaa fursad ay dhakhso ku helaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan qofka diiwaanka ku jira ee qabaa itaal darri marka lala kulmo xaalad degdeg.

Yaa loo ogol yahay?

Dhamaan xubnaha bulshada ee qaba itaal darrida garashada ama itaal darri laga yaabo in ay waxyeelo gaarsiisay awoodooda sheegidda.

Maxaa loo baahan yahay in aan sameeyo haddii qofka aan jeclahay uu maqan yahay?

Dhakhso wac 911 una sharax in qofka aad jeceshahay uu beelay xasuusta ama in uu qabo itaal darri kale. Haddii uu qofka ku qoran yahay brograamka Guriga i Geey (Take Me Home), hubso in aad sidoo kale u sheegtid hawl wadeenka.

Sidee ayay tani ku kaalmeyn kartaa?

Macluumaadka ku saabsan muuqaalkooda, meelaha ay badanaa tagaan, iyo waxyaabaha kiciya iyo kuwa dajiya, waxaa loo diri doonaa dhamaan hirgelinta sharciga xaafadda si ay u raadiyaan qofka maqan.

Maxaa loola jeeda Habow?

Habowga waa dhacdo aan horay loo saadaalin karin ee lala kulmo marka qofka qaba ilowga ama qofka qaba itaal darrida koriimada ka tago meel ammaan ah ama uu lumo. Tani waxay ka dhici kartaa xattaa meelaha la yaqaan sida gurigaaada ama xaafadaada.

Marka qofka habaabo, waxaa laga yaabaa in qofka uu:

- Ku mashquulsan yahay raadinta wax ay aqoonsan karaan, gaar ahaan haddii ay u soo guureen meel cusub sida hay'adda daryeelka xasuusta ama dugsi cusub.
- Ka baxsanaayo culeys saaran, murugo, ama dareen ku soo battay sida wada hadalka badan, qeylada telefishanka, ama martida timaada guriga.
- Ku nool yahay caadiga la soo dhaafay sida tagidda ama ka soo noqoshada shaqada, soo qaadidda caruurta, iwm.
- Uu naftiisa dajinaayo si uu uga kabsado dagganaasho la'aanta ama caajiska
- Ka fal celinaayo dhibaataada haysato sida suurtoogalka ah



Sidee Ayaan Uga Hortagi Karaa Habowga?



Is diyaari. Ogeysii deriska ama ganacsatada deegaanka iyo hubso in qofka aad jeceshahay uu qaato aqoonsi.



Ka dhig guriga meel ammaan ah. Ku fakar in aad guriga gelisid qalabka sheega dhaqaaqa qofka ama qalabka sheega marka albaabka la furo, hubso in qufulada/dariishadaha ay xeran yahiin, iyo in aad meelaha u dhaw albaabka ka qaadid waxyaabaha ku baaqa bixid (sida kabaha, fureyaasha, boorsooyinka yaryar).



Aqoonso waxyaabaha kiciya sida suurtoogalka ah. Ma waxaa la socda caajis, fahmo darro, baahi?



Kordhi hawlaha jirka. Iskuday in aad u heshid meel ammaan ah uu qofka ku socdo iyo sahmiyo, sida jidka dhexmarra guriga ama dhabaha dhexmara soohinta deydka dambe.



In badan ogow, isku qor brograamka. www.sdsheriff.gov/takemehome